# Islaamka iyo Muslimiintu way ka soo horjeedaan rabshadaha ka-dhanka ah Haweenka

## Tilmaan-Bixiyaha Haweenka

*Haweenka Muslimiinta ah iyo haweenka dhalinyarada ah ee la kulmay rabshada qoyska iyo Muslimiinta raadinaya fahamka masuuliyadeed ee rabshada qoyska*

The Australian Muslim Women's Centre for Human Rights
*Equality without Exception*

THE AUSTRALIAN MUSLIM WOMEN'S CENTRE FOR HUMAN RIGHTS

*Equality without Exception*

Waxaa daabacay:

**Xarunta Haweenka Muslimka ee Australia ee Xuquuqda Aadanaha**

Telefoonka: (03) 9481 3000

Fakiska: (03) 9481 3001

Email: reception@muslimwomenscentre.org.au

Web: www.ausmuslimwomenscentre.org.au

**Macluumaadka Xuquuqda daabacaada**

© 2019 Xarunta Haweenka Muslimka ee Australia ee Xuquuqda Aadanaha
Waxyaabahan lama soo saari karo iyada oo aan fasax laga haysan Xarunta.

Qoraalkan waxaa sidoo kale laga heli karaa luqadaha Carabiga, Dariga, Farsiga, iyo Urduga.

ISBN: 978-1-7337330-0-7

Waxaa si sharaf leh u maalgeliyey: VICTORIA State Government

*Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee nazariis guud iyo mid gaaraba Naxariista*

*Dadow waxaan idinka abuuray lab iyo dhaddig, waxaana idinka yeellay shucuub iyo qabiilooyin siaad isu aqoonsataan. Ruuxase ugu sharafta badan Eebe agtiisa waa ka idiinku dhawrsasho badan, Eebana wax walba waa ogyahay.*

*Al-Hujurãt 49:13*

*Waxaa jira hal run oo caalami ah, oo lagu dabaqi karo dhamaan wadamada, dhaqamada iyo bulshooyinka oo dhan: rabshada ka dhanka ah haweenka marnaba lama aqbali karo, marnaba lama dhaafi karo, marnaba looma dulqaadan karo.*

*Ban Ki-Moon, UN Secretary-General, 2008*

# Jadwalka Tusmada


*Wax ku saabsan buug-yarahan* 3

*Tilmaan-bixiyaha haweenka Muslimka ah oo ay sameeyeen haween Muslim ah* 3

*Xidhiidhka u dhexeeya guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah iyo rabshada qoyska* 5

*Rabshaddaha ka dhanka ah haweenka: Xaqiiqda iyo tirooyinka* 7

Waa maxay rabshadda qoyska? 7

Waa maxay rabshadda lamaanaha? 8

Rabshadda Qoysku waa arin halis ah 8

Dhibbaneyaasha rabshada qoyska 9

*Rabshadda qoyska ee ka jirta bulshada Muslimka ee Australia* 11

Xadgudubka caadifadeed ama nafsiyeed 12

Xadgudubka maaliyadeed/dhaqaaleed 13

Xadgudubka bulshadeed 14

Xadgudubka galmada 15

Xadgudubka iyo khasabka taraneed 17

Xadgudubka ruuxiga ah 18

*Guurka ilmaha, guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah (CEFM)* 19

Waa maxay guurku? 19

Waa maxay ogolaanshaha xagga guurka ah? 20

Waa maxay guurka ilmahu? 21

Waa maxay guurka yaraanta? 21

Waa maxay guurka khasabka ah? 22

Qaababka kale ee guurka khasabka ah 23

*Saamaynta rabshada loo gaysto haweenka* 25

*Saamaynta rabshadda qoyska ku leedahay carruurta* 27

*Saamaynta rabshadu ku leedahay qoysaska* 29

*Saamaynta guurka ilmaha, guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah* 30

Macnaha isbeddelka: Su'aalaha muhiimka ah qaarkood 32

Rabshadda qoysku ma wax ku saabsan baa dhaqanka mise diinta? 32

Maxay raggu u adeegsadaan rabshada ka dhanka ah qoysaskooda? 32

Maxay u dhacaan guurka ilmaha, guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah? 33

Ma dhibaato bulshadeed baa mise waa arrin qoyseed? 34

Maxaan ugu eedeyneynaa haweenka rabshadaha ka dhanka ah iyaga? 36

*Guurka, rabshada iyo xuquuqda aadanaha* 37

*Raadinta taageerada: Waa tallaabada kowaad ee muhiimka ah* 39

*Adeegyada Taageerada (Victoria)* 41

*Sida loo soo sheego haddii aad ku jirto ama aad halis ugu jirto guurka khasabka ah* 45

*Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee nazariis guud iyo mid gaaraba Naxariista*

*Ciddii camal fasha wanaag oo Raga ama haweena isagoo mu'mina waxaan noolaynaynaa Nolol wanaagsan, waxaana ku abaal marinaynaa Ajirkooda waxa ugu Wanaagsan ee ay falayeen.*

*An-Nahl 16:97*

# *Wax nagu saabsan*

## The Australian Muslim Women's Centre for Human Rights

*The Australian Muslim Women's Centre for Human Rights (AMWCHR) (Xarunta Haweenka Muslimka ee Australia ee Xuquuqda Aadanaha (AMWCHR)) waa haya'dda haweenka Muslimka ah oo u shaqeysa xuquuqda haweenka Muslimka ah ee Australia. Waxaan aaminsanahay in haweenka muslimka ah ay yihiin inay noqdaan kuwa dhiirigeliya isbedelka xaaladdooda ka muwaadiniin. Haya'deenu waa haya'd aan diini ahayn, taas oo noo ogolaaneysa inaan qaadanao kala duwanaanshaha buuxa ee haweenka muslimiinta ah, waxaanan hubineysaa helitaankayaga iyo ku haboonaantayada dhammaan qaybaha, dugsiyada iyo kooxaha ka dhex jira bulshada Muslimka ah.*

### Xeerarkayada

Xeerka aasaasiga ah ee sheegaya qaabkayaga loo wajahayo shaqadeena waa in sinnaanta haweenka muslinka ah ay tahay:

- midaan kala reebid lahayn
- midaan uqalmid lahayn
- midaan khatar lahayn.

### Sidee baan ugu adeegnaa haweenkeena?

Waxaan kala mudnaan siinaa hawlaha wax-ku-oolka aha ee haweenka taas oo u hagaajisa noloshooda habab la taaban karo oo la qiyaasi karo. Waxaan kala shaqeynaa shaqsiyaadka, kooxaha iyo adeeg bixiyeyaasha qaybaha soo socda:

- Shaqada kiisaska, u gudbinta iyo udoodida haweenka gaarka ah kuwaas oo u baahan taageero
- U-doodista arrimaha muhiimka u ah haweenka – ayadoo lala shaqeynayo adeeg bixiyeyaasha iyo dhammaan heerarka dowladeed
- Barnaamijyada bulshada ku salaysan oo diirada saara arrimaha bulshada oo gaarka
- Mashaariicda kor-u-qaadida awoodda bulshada muslinka ah kuwaas oo xoogga saara caqabadaha horyaal waddan cusub
- Horumarinta hoggaaminta haweenka da' kastaba
- taageerada iyo horumarinta haweenka dhalinyarada Muslimiinta ah
- Tababaridda iyo taageerida xirfadlayaasha la shaqeeya haweenka Muslimka ah iyo qoysaskooda.

*Haweenku dhar (Asturaad bay) idiin yihiin, idinkuna dhar (asturaad baad) u tihiin.*

*Al-Baqarah 2:187*

# *Wax ku saabsan buug-yarahan*

## Tilmaan-bixiyaha haweenka Muslimka ah oo ay sameeyeen haween Muslim ah

Tilmaan-bixiyahan waxaa loogu talagalay dhammaan haweenka Muslimiinta ah ee la kulma ama ka walwalsan rabshadda qoyska. Waxay kaloo loogu talagalay tirada sii kordhaysa ee xubnaha bulshada Muslimka kuwaas oo doonaya inay si fiican u ogaadaan wax ku saabsan nooca rabshadda qoyska, saameynta ay ku leedahay dhibbanayaasha iyo bulshada Muslimka ah. Ayadoo ay sii kordhayso, sida bulshada kale Australia, bulshada Muslimka ah waxay si fiican u fahmeysaa in rabshadda qoyska kaliya aysan saameyn ballaaran iyo muddo dheer ku yeelanaynin nolosha dadka ay taabato hase ahaatee sidoo kale hoos u dhigayso oo burburinayso bulshada guud ahaan.

Macluumaadka ku jira buug-yarahan wuxuu ku saleysan yahay waayo-aragnimadeena 20 sano ee kala-shaqeynta haweenka Muslinka ah wax ku saabsan arimaha rabshadda qoyska. Waxaa kale oo ku jira shaqada khabiiro kale oo badan, oo ay ka mid yihiin khabiirada caafimaadka dhimirka, cilmi-baarayaasha, aqoon-yahannada iyo shaqaalaha sharciga kuwaas oo la shaqeeyay labada dhibaneba iyo dembiileyaasha rabshadda qoyska. Waxaa muhiimad leh, in tilmaan-bixiyahan ay ku jiraan aragtida iyo shaqada haweenka haweenka Muslimka ah iyo ragga kuwaas oo ka shaqeeya ilaalinta iyo ammaanka haweenka iyo qoysaska dhammaan dunida Muslimka dacaladeeda, oo ay ku jiraan dalalka Muslimka ah.

Tilmaan-bixiyahan waxaa ku dhex jiraa barashada culimada Muslimka ah ee Qur'aanka iyo Sunnah wuxuuna si cad oo caddaalad ah u muujinayaa in rabshadda ka dhanka ah haweenka aysan ka mid ahayn dhaqanka caqiidada diinta Islaamka iyo inay na siinayso tilmaamaha qaarkood oo Islaamku ka-tagan yahay darajada haweenka iyo rabshadda qoyska.

Buug-yarahan waxaa lagu sameeyey qaabka Australiyaanka ah waxuuna eegayaa sida nidaamka sharci ee Australia ula dhaqmo arinta rabshadda ee qoyska gudahiisa, gaar ahaan marka la eego guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah, kaas oo ku xiran isbeddel wayn oo ka dhex jira bulshada, dowladda iyo qaybaha sharciyeed.

Waxaa muhiim ah in la ogaado in tani ay tahay keliya hordhaca rabshadda qoyska. Caawimaad iyo taageero dheeraad ah ayaa had iyo jeer laga heli karaa adeegayaga iyo haya'do badan ku qoran gadaasha tilmaan-bixiyahan. Waxaan sidoo kale ku darnay macluumaad ku saabsan khayaarada sharciyeed ah haddii aad tahay dhibanaha rabshadda qoyska ama aad tahay guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah.

Tilmaan-bixiyahan looma qorshaynin inuu caawiyo haweenka ku jira qalalaasaha. Si kastaba ha noqotee, liiska adeegyada waqtiga qalalaasaha, oo ay ku jiraan adeegyada booliiska, ayaa la siiyaa haddii loo baahdo gargaarka qalalaasaha. Haddii aad ku jirto xaaladaas, waxaan kugu boorinaynaa inaad la hadasho xirfadle sida ugu dhakhsaha badan.

Bulsho kasta oo caalamka ka mid ah, cidhibtirka rabshadaha qoyska ee ka dhanka ah haweenka, gaar ahaan kuwa guriga, waxay noqotay hawl adag, oo kakan ayadoo ah hab gaabinaya. Haween aad u tiro badan ayaa naftooda ku waayey nimankooda rabshoolaha ah ee gurigooda dhexdiisa, iyadoo carruur aad u farabadan ay awoodi waayey inay ka bogsadaan qaxarkii arkidda rabshada guriga. Rabshada guriga dhexdiisa ah maahan arrin gaar ah; mana ahan dhaqan qadiimi ah ama mid diimeed oo muqadas ah. Had iyo jeer waa wax waxyeello waligeed gacan ka gaysan muqadasnimada qoyska. Ragga iyo haweenkaba labadaba waxaa hoos udhiga rabshadaha.

Muslimka Australia, haku cusuboonaadeen waddankan ama ha ahaadeen qoysas halkan ku sugnaa jiilal badan, waxay fahamsan yihiin in bulshooyinka Muslimka ah ay la kulmaan caqabado badan xagga inay Australia ka dhigtaan guryahooda. Kuwaas qaar ka mid ah, tani waxay hoos u dhigtay mudnaanta wax ka qabashada rabshada qoyska. Hase ahaatee marka loo eego caqabadaha hortaagan Muslimiinta, waxaa muhiim ah in rabshada guriga dhexdiisa ah wax laga qabto, sababtoo ah waxaan ubaahanahay qoysasku inay noqdaan kuwo jacayl iyo amaan u leh xubnaha bulshada ee xooggan, dabacsan oo caafimaad leh. Cidhibtirka rabshadaha waa arrin deg-deg ah sababtoo ah murugada haweenka iyo carruurta waxay wax yeelaysaa hufnaanta bulshadeena. In la ogolaado rabshadaha guriga dhexdiisa waa in la wiiqo sharafta iyo adkaysiga bulshada muslimka ah.

Waxaan rajeyneynaa in buug-yarahan inuu yahay tallaabo wax-ku-ool u ah kor u qaadida wacyigelinta bulshada iyo caawinta haweenka muslimka ah inay noolaadaan ayagoo xor ka ah hanjabaadaha rabshada.

# Xidhiidhka u dhexeeya guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah iyo rabshada qoyska

Hal xoogsaaris ee xogtan waa guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah. Waxaa jira sababo badan oo ay ka midka yihiin guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah oo ku saabsan qeexitaankeena rabshada ka dhacda qoysaska dhexdooda. Muhiimadda ugu weyn waa warbixinnada kowaad oo laga helay haweenka kuna saabsan waxyeellada, dhibaatada iyo walbahaarka ka dhasha guurkaas. Sidoo kale, waxaa la muujiyey in guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah ay kordhiyaan halista noocyada kale ee rabshada qoyska.

Muslimiin badan, go'aanka in la guursado wuxuu ka dhacaa xuduuda guriga. Waxaa loola jeedaa xubnaha qoyska, iyo kayska haweenka da'da yar oo doonaya inay yaraanka ku guursadaan, fasaxa ama oggolaanshaha waxaa bixiya waalidka. Sababtan awgeed ayaannu u doorannay inaan ku darno guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah tilmaan-bixiyaha rabshada qoyska.

Guurka, badiba bulshooyinka Muslimka ah, waa arrin qoys.

Sannadkii 2013, sharciga Australia wuxuu sharci darro ka dhigay in lagu qasbo, loogu hanjabo ama qof lagu khiyaaneeyo inuu guursado. Waxa kale oo mar kasta sharci darro ah in la guursado ilmo da'diisu ka yar tahay 16 sano, sababtoo ah ilmaha waxaa loo arkaa midaan awood u lahayn inuu fahmo dabiicadda dhabta ah ama saameynta xafladda guurka.

Intaa waxaa dheer, sanadkii 2019 Victoria waxay ku dartay guurka khasabka ah liiska tusaalooyinka rabshadda qoyska marka la raacayo Family Violence Protection Act 2008 (Sharciga Ka-Ilaalinta Rabshadda Qoyska ee 2008); Sharcigu hadda wuxuu sheegayaa in adeegsiga khasabka, hanjabaadda, xadgudubka jireed ama xadgudubka caadifadeed, ama nafsiyeed ee loo geystey inay sababto ama isku daydo inay sababto inuu qofku galo guur wuxuu noqon karaa rabshad qoys.

Guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah waa ka dambiyo halkan Australia. Dambi-ka-dhigidu waa jawaab ka timid wacyiga sii kordhaya ee Australia iyo adduunka oo dhanba, waddamada Muslimka ahna waa ka mid, dhibaatada guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah ay ugaystaan haweenka iyo carruurta. Waxaa jira wacyi-gelin sii kordhaysa ee noocyada kala duwan ee waxyeellada iyo ilaalinta carruurta iyo haweenka da'da yar u baahan yihiin.

Maaddaama dhaqamada iyo bulshooyinku ay horumareen, waxaanu gaarney fahamka fiican ee xiriirada, guurka, saameynta galmadu ku leedahay caafimaadka haweenka iyo caafimaadka dhimirka iyo saameynta dheer oo ay ku leedahay haweenka iyo carruurta rabshadda iyo xadgudubka qoysaska. Waxaan ognahay in guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah uu kordhiyo dhacdooyinka iyo suurtogalnimada noocyada kala duwan ee xadgudub ah oo lagula kaco haweenka. Waxaan ognahay in guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah ay kordhiyaan dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka iyo yareynta fursadaha nolosha iyo samaqabka. Saameynta buuxda ee guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah ayaa mar dambe lagu sharaxay buug-yarahan.

*Waxaan ka baqay in la i-guursado da'daas yar. Ma aanan aqoon waxa galmadu tahay, waxayna igu ahayd mid dhib badan. Waxay igu lahayd saameyn aad u weyn waxaana u arkay naftayda inaan ahay shay.*

*Waxay igu lahayd xanuun aad u daran inaan guursado qof aan u arkay qayrul masuul.*

*Hadda waxaan qabaa dhibaatooyin xagga caafimaadka ah oo aan ka qaaday guurkii dhallinyaranimada. Waxay saameysaa jirka gabadha yar. Waxaan dareemayaa inaan ahay qof haween ah oo gabowdey.*

*Guursiga dhalinyaranimada uma wanaagsana caafimaadka. Jirku diyaar uma ahan sidaas darteed waxaa jira dhibaatooyin. Qofna looma sharaxin guurka. Waan naxay oo qayliyey.*

*Guursiga dhalinyaranimada ayaa hawenka dumisa. Dhamaan gabdhuhu way xanuunsadaan. Jidhku waa mid da' yar. Raggu ma diyaarin karaan gabdhaha.*

*Padma, Marrying Young (oo guursatey ayadoo dhalin yar), p. 11*

# *Rabshaddaha ka dhanka ah haweenka: Xaqiiqda iyo tirooyinka*

Fal kasta oo ah rabshad ku salaysan jinsi taas oo keenta, ama ay u badan tahay inay keento, waxyeelo jireed, galmeed ama nafsiyeed ama xanuun u geysta haweenka, oo ay ku jirto ku hanjabidda falal noocaas ah, khasab ama xayiraad xorriyadeed, haddii ay ku dhacdo nolol bulshadeed ama mid gaar ah.

*Baaqa Qaramada Midoobay ee ku saabsan Cidhibtirka Rabshada ka dhanka ah Haweenka*

## **Waa maxay rabshadda qoyska?**

*Waxaa soo warisay Caaisha:*

*Alle rasuulkiisu (naxariisi korkiisa ha ahaatee) Weligii gacantiisa cidna kuma garaacin, Midkoodna qof shaqaale ah ama dumar ah.*

*Sahih Muslim, Book Al Fadail, no. 2328*

*Rabshadda qoysku waa dabeecad kasta oo uu keeno xubin qoys oo sababta waxyeelo jireed, galmeed ama caadifadeed ama u keento cabsi isaga/iyada inuu ku noolaado cabsi nafteeda/naftiisa ama qof kale. Rabshad qoysku waa khaladka adeegsiga awoodda iyo rabitaanka ama door bidada in la caburiyoo lamaanaha, xaaska, ilmaha ama xaaladda.*

*Waxay sidoo kale ka dhici kartaa xiriirada qoyska oo balaaran waxaana ka mid ah ku xadgudubka ama dayaca carruurta ee qof weyn, dabeecada dagaal ee ilmaha ee ka dhanka ah waalidka, xadgudub ilmaha uu u gaysto walaalihiisa/da iyo rabshadda ka timaadda qaraabada kale, oo ay ka midka yihiin xididka.*

*Rabshad qoysku waxay ka dhacdaa qoysaska adduunka oo dhan iyadoo aan loo eegin duruufaha dhaqaale ama asalka diineed. Falka rabshadda ee loo gaysto xubin qoyska ka mid ah waa rabshad qoys iyadoo aan loo eegin asalka dhaqanka ama diinta ee qofka.*

## Waa maxay rabshadda lamaanaha?

Shuruudo badan ayaa loo isticmaalaa in lagu tilmaamo rabshaddaha qoyska markay ka dhex dhacaan lamaanayaasha, sida rabshadda guriga, rabshadda lammaanaha, rabshaddaha galmada, xadgudubka lamaanaha iyo dilka xaaska.

Waxaa muhiim ah in la muujiyo farqiga u dhexeeya rabshadda qoyska iyo tan lammaanaha, sababtoo ah badankooda rabshaddaha guriga ama gudaha qoyska waxaa ku kaca ragga ka dhanka ah haweenka kuwaas oo leh ama lahaan jireen xiriir qoto dheer.

Maaha wax aan caadi ahayn in labada lamaane ay is khilaafaan, murmmaan ama isku caroodaan midba midka kale. Taasi waa caadi. Hase ahaatee isticmaalka xoog-muquunis ama rabshad, ama falka dabeecada caburinta iyo/ama xakamaynta ama dabeecadaha yasidda iyo/ama kuwa dadka ka dhigaya inay dareemaan cabsi ama amaan darro maahan khilaaf caadi ah qaybna ka ahayn xiriirka.

## Rabshadda Qoysku waa arin halis ah

Halkan Australia, celcelis ahaan, hal haween ah toddobaadkii ayaa waxaa dila lammaanaheeda hadda ah ama lammaanihii hore.

*Australian Institute of Criminology (Machadka Australia ee Dambiyada) (AIC) 2017*

Sannadkii 2017 Warbixinta National Homicide Monitoring Program (Barnaamijka Korjoogteynta Dilka Qaran) ee ay soo-saartay AIC waxay muujisay in muddo ka badan laba sano laga soo bilaabo 2012/13 ilaa 2013/14, waxaa jiray 99 dhibbane dhedig ah oo dil lamaane wada nool. Haweenku waxay ugu badan yihiin dhibbanayaasha dilalka wada nool, oo tiradoodu tahay 79 boqolkiiba dhammaan dilalka lamaaneyaasha wada nool. Waa kuwan qaar ka mid ah natiijooyinka kale:

- Qiyaasaha caalamiga ah oo ay soo saartay World Health Organisation (Haya'dda Caafimaadka Adduunka) ayaa tilmaamaya in qiyaastii saddex halkii haween ee adduunka ah (35 boqolkiiba) ay la kulmeen rabshad jireed iyo / ama rabshadda galmeed ee lamane wada nool ama rabshadda galmeed ee aan lamane ahayn noloshooda.
- Inta badan rabshadahan waa rabshad lamaanaha xiriirka dhow is-laleh. Dunida oo dhan, qiyaastii saddex meelood meel (30 boqolkiiba) haweenka ku jiray xiriirka guurka ah waxay soo sheegeen inay la kulmeen nooc ka mid ah rabshad jireed / ama galmeed oo ay ku sameeyaan lamaane xiriirka dhow laleh.
- Caalami ahaan, in ka badan 38 boqolkiiba dilka haweenku waxaa sameeya lamaanaha dhow ee ragga ah.
- Mid ka mid ah lixda haween ee Australiaan ah waxay la kulmeen rabshada jireed ama galmeed ee lamaanahooda hadda ah ama hore.

- Haweenka da'da yaryar ee Australia (18-24 sano jir) waxay la kulmaan qiyaaso heer sare ah ee rabshada jireed ama galmeed marka la barbar dhigo kooxda haweenka da'da weyn.
- Rabshadda qoyska waxay si toos ah u saameyneysaa mid ka mid ah shantii haween ah ee reer Victoria ah intii lagu jiray noloshooda. Waa sababta ugu weyn ee keenta dhimashada laga hortagi karo, iinta iyo jirrada haweenka Victoria ee da'doodu u dhaxayso 15 ilaa 44 sano.

## Dhibbaneyaasha rabshada qoyska

*Rabshada lamaanaha badanaa waxay dhacdaa marka haweenku uur leeyihiin.*

Sida kor ku xusan, haweenku ayaa aad ugu badan dhibanayaasha iyo ragga ayaa aad ugu badan kuwa xadgudubka ka geystay guriga dhexdiisa. Hase ahaatee sidoo kale waxaa muhiim ah in loo aqoonsado in marka lagu daro in xubnaha qoyska ay yihiin dhibanayaasha xadgudubka iyo rabshadda, hadana arkidda xadgudubka ama rabshada sidoo kale waa nooc rabshad qoys ah.

Sida ku xusan Sharciga Victorian Family Violence Protection Act (2008), (Sharciga ka-Ilaalinta Rabshadda Qoyska ee Victoria (2008), rabshadaha qoyska waxaa ka mid ah dabeecadaha ukeenaya ilmaha inay arkaan ama maqlaan ama la kulmaan rabshada qoyska. Waxaanu ku liis-garayn doonaa tusaalooyinka hoose, hase ahaatee Sharcigu wuxuu caddeynayaa sidan soo socota:

Dabeecadda soo socota waxay noqon kartaa ilmaha oo maqla, arka ama haddii kale la kulma saameynta dabeecadda lagu tilmaamay faqradda (a): maqashiinta hanjbaadda xadgudub jireed ee xubin qoyska ka mid ah ugayato xubin kale oo qoyska ah; arkidda ama dhageysiga weerarka xubin qoyska ah ugayato xubin kale oo qoyska ah; u-raaxaynta ama siinta caawimaad xubin qoyska ka mid ah kaas oo jir ahaan ugu xadgudubtey xubin kale oo qoyska ka tirsan; nadiifinta goobta ka dib markii xubin ka tirsan qoyska uu si ula kac ah u waxyeelleeyey hanti xubin kale oo qoyska ka tirsan; inay joogaan marka askarta booliisku ay yimaadaan dhacdo ku lug leh xadgudub jireed oo xubin qoyska ka mid ah ugaysato xubin kale oo qoyska ah.

*Caalami ahaan, rabshadda ka dhanka ah haweenka waa sababta ugu wayn ee dhimashada iyo iinta haweenka iyadoo aan loo eegin da'dooda. ...*

*10kii daqiiqo ee kasta, meel dunida ka mid ah, gabar dhalinyaro ah ayaa u dhimanaysa rabshad.*

*UN Women, National Committee Australia*[1]

*Rabshadda ku salaysan jinsiga: rabshaddaha gaar ahaan 'loo gaysto haweeney sababtoo ah waxay tahay haweeney ayaa u saameysa haweenka si aan caadi ahayn'*

*Our Watch*[2]

1 unwomen.org.au/our-work/focus-areas/eliminating-violence-against-women/, accessed 21 December 2018

2 www.ourwatch.org.au/understanding-violence/facts-and-figures, accessed 21 December 2018

# *Rabshadda qoyska ee ka jirta bulshada Muslimka ee Australia*

*Rabshada qoysku waxay ka dhacdaa aduunka oo dhan, wadan, gobol iyo bulsho. Sida laga soo xigtay Australian Bureau of Statistics (Xafiiska Tirakoobka Australia) (2017b), hal ka mid ah lixdii haween ee Australia ah oo da'doodu ka weyn tahay 15 jir ayaa kala kulanta rabshad jireed ama galmeed oo uu la sameeyay lamaane iyo ku dhawaad afartii midba hal ayaa la kulanta xadgudub caadifadeed. Ma jiraan tirokoobyo eegaya rabshada qoyska si gaar ah dadka soo galootiga iyo kuwa bulshada muslimka ah, hase ahaatee xirfadlayaasha ka shaqeeya qaybta waxay aaminsanyihiin in tiradu ay aad isugu egtahay.*

*Rabshada qoysku waxay noqon kartaa mid jireed, caadifadeed, dhaqaaleed, bulshadeed, galmeed, taraneed ama ruuxeed. Kuwa soo socda ayaa ah noocyada xadgudubka haweenku la kulmi karaan, waxaana ku darnay tusaalooyin faahfaahsan oo ku saabsan rabshad gaar ah oo laga yaabo inay la kulmaan haweenka soo galootiga ah ama kuwa Muslimka ah.*

## Xadgudubka caadifadeed ama nafsiyeed

*Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee nazariis guud iyo mid gaaraba Naxariista*

*Muminiinta, rag iyo dumar qaarba qaarka kale ayuu ilaaliye u yahay*

*At-Tawbah 9:71*

Xadgudubka caadifadeed ama nafsiyeed waa dabeecad ciqaabta, cabsi gelisa, kadeeda ama weerar ku ah qof kale. Tusaale ahaan waxaa ka mid noqon kara:

- ugu yeeridda magacyo cunsurinimo ah
- eedeynta ah inaad ka tagtay dhaqankaagii
- hanjabaad in la waxyeelaynayo qof qoyskaaga ka mid ah ee jooga Australia ama wadankaagii hooyo
- ka-ilaalinta sameynta ama yeelashada xiriiro dadka muhiimka u ah noloshaada
- burburinta ama la wareegida waraaqaha sharciga ee muhiimka ah sida baasaboorka qoyska ama shahaadooyinka dhalashada
- burburinta hantida shakhsi ee kala timid wadankaaga hooyo
- In lagu qasbo in la aamino in rabshadda qoysku aysan ka ahayn sharci daro Australia
- In lagu qasbo in la aamino in haddii aad codsato booliska, samafalka ama caawimaada sharciga, inaad si toos ah u luminayso haysashada sharciga ah ee carruurta
- in lagugu eedeeyo in laguu guursanayo ujeedo socdaal oo kaliya, iyadoo lagugu hanjabayo ama in warbixino rasmi ah loo gudbinayo haya'daha socdaalka
- In lagugu eedeeyo inaad duminayso qoyska iyo bulshada haddii aad guurka ka tagto
- hanjabaadda musaafurinta; diidmada inaad gudbisato faylka, ama kala noqoshada waraaqaha socdaalka.

Inta badan, dadka xadgudubka geysta waxay sidoo kale u adeegsadaan carruurta inay wax ka qabtaan dhibbanayaashooda ayagoo:

- ku hanjabaya ama dhab ahaantii ka qaadaya carruurta, laga yaabee inay geeyaan wadan kale oo haweenku aysan laheyn xaq u lahaanshaha sharciyeed ee haysashada
- u hanjabaya ama dhab ahaantii waxyeellaynaya carruurta
- isticmaalaya heerka socdaalka ee kiisaska haysashada, si ay u waxyeelleeyaan fursaddeeda iyo inay ka weeciyaan dareenka maxkamadda rabshadda qoyska.

## Xadgudubka maaliyadeed/dhaqaaleed

*Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee nazariis guud iyo mid gaaraba Naxariista*

*Ragga waxaa u sugnaaday qayb waxay kasbadeen, Haweenkana waxaa u sugnaaday qayb waxay kasbadeen*

*An-Nisã' 4:32*

*Kuwa la furo waxaa u sugnaaday gacan maris (Mataac) si fiican, waxayna ku tahay Xaq kuwa dhawrsada.*

*Al-Baqarah 2:241*

Xadgudubka maaliyadeed waa dabeecad loola jeedo in lagu qasbo, khiyaano ama si aan macquul ahayn loo caburiyo qof kale, iyadoo aan qofkaas ogolaansho laga haysan taasoo ah qaab u diidaya madaxbannaani maalyadeed ama ka xannibaya taageerada maaliyadeed ee lagama maarmaanka ah. Tusaale ahaan waxaa ka mid noqon kara:

- in lagu qasbo inay ka baxaan caburinta hantida iyo dakhliga
- in hantidaada laga qaado ama la hayo iyada oo aan ogolaansho laga haysan, ama hanjabaad dabeecadahaas oo kale ah
- in hantidaada aad leedahay, ama wadajir ahaan u leedihiin, la iibsho adoon rabin ama uusan jirin cudurdaar sharciyeed
- ayadoo uusan jirin cudurdaar sharciyeed, in lagaa dhowro helitaanka hantida maaliyadeed ee wadajirka u leedihiin oo ujeeddaduna tahay in la daboolo kharashyada caadiga ah ee guriga
- in lagugu qasbo inaad codsato lacag-bixinta Centrelink ama lagugu qasbo inaad ka baxdo lacag-bixinta Centrelink
- in lagugu qasbo inaad saxiixdo awooda qareenka taasoo awood u siinaysa in dhaqaalahaagu uu qof kale maamulo
- in lagugu qasbo inaad saxiixdo heshiis ku saabsan bixinta dhaqaale, amaah ama deyn
- ka hortagidda raadinta ama haysashada shaqada
- ka hortagga barashada Ingiriisiga iyo helitaanka xirfadaha shaqo ee kale, ama lagugu qasbo inaad si sharci darro ah u shaqeyso
- in lagugu kadeedo shaqada, taas oo keentay ka-eryid iyo / ama la'aanta fursado shaqo ee sharciyeed
- in lagu weydiisto bixinta khidmadaha fiisada socdaalka
- in lagugu khasbo inaad ka baxdo lacagaha loogu talagalay dhaxalka
- in lagugu khasbo inaad oggolaato helitaanka koontadaada bangigaaga
- xadidda lacag aad u dirayso wadankaagii hooyo si aad u taageerto qoyskaaga.

## Xadgudubka bulshadeed

*Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee nazariis guud iyo mid gaaraba Naxariista*

*Ee ah kuwa dhageysta hadalka oo raaca kiisa fiican, kuwaasna waa kuwa Eebe hannuuniyey, kuwaasna iyaga uun baa ah kuwa caqliga leh.*

*Az-Zumar 39:18*

Xad-gudubka bulshadu wuxuu ku saabsan yahay takooridda haweeney ka timid shabakadaha taageeradeed bulshadeed iyo qoyseed si ay u xakameyso iyada. Tusaale ahaan waxaa ka mid noqon kara:

- in lagaa hor-istaago inaad aragto asxaabteeda, qoyskeeda, ama dadka kale
- inaan loo ogolaan inay ka baxdo guriga
- inaan loo ogolaan inay ka qaybgasho nashaadyada mujtamaca iyo bulshada
- u baahasho inaad u sheegto meel kasta oo aad joogtay ama aad tagtay
- u baahasho inaad u sheegto cidda aad aragtay ama aad qorshaynayso inaad aragto
- in been lagaaga sheego saaxiibada iyo qoyska; isku-day in dadka kale lagaa horkeeno
- isku-day ula-kac ah in lagaa dhigo qof xun ama lagaa ceebeeyo dadka kale hortiisa
- in lagaa hor-istaago muujinta asalkaaga dhaqameed
- xaddidaadda helitaanka gaarigaaga, noocyada kale ee gaadiidka, kursiga curyaamiinta, ama qalabka dhaqdhaqaaqa
- faafinta sirahaaga ama siraha qoyskaaga si aad ugu ceebowdo bulshada dhexdeeda ama saaxiibadaada ama qoyskaaga
- in lagaa hor-istaago inaad la kulanto dadka ku hadla luqaddaada hooyo
- kansal-garaynta rukunkaaga wargeysyada iyo joornaalada luqaddaada kusoo baxa
- ka-takoorida qoyska iyo shakhsiyaadka kale ee wax taageera bulshada dhexdeeda
- ka-hortagga iyo xakamaynta dhexgalka bulshada ku hadasha Ingiriisiga
- ka-xiyiridda helitaanka qalabka isgaarsiinta sida telefoonada gacanta (moobaylka)
- inaan loo ogolaan in lala hadlo ragga
- ka-hortaga helitaanka adeegyada haddii aysan bixinayn haween (tusaale ahaan dhaqaatiirta)
- in lagugu khasbo inaad saxeexdo waraaqaha Ingiriisiga ah ee aadan fahmin.

## Xadgudubka galmada

*Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee nazariis guud iyo mid gaaraba Naxariista*

*Kuwa (Xaqa) Rumeeyow idiinma Bannaana inaad u Dhaxashaan Haweenkka Xoog.*

*An-Nisã' 4:19*

*Ali ibu abi Talib wuxuu yiri:*

*Haddii midkiin u soo dhowaado xaaskiisa ha dedejinin iyada ilaa ay qanciso baahideeda sidaad u jeceshahay inaad u qanciso baahidaada.*

Rabshada galmeed waa in lagugu qasbo, lagugu cadaadiyo ama lagugu khiyaano falalka galmada aadan rabin inaad sameyso; xadgudubka galmeed waa dabeecad haweenka ka dhigaysa inay dareemaan hanjabaad, cabsiin ama raaxo la'aan. Tusaale ahaan waxaa ka mid noqon kara:

- kufsiga
- si ula kac ah u-gaysiga xanuun inta lagu jiro galmada
- in lagu qasbay galmo ayadoon lahayn uur ama cudurada galmada lagu kala qaado
- in lagu qasbay in la sameeyo falalka galmad
- adeegsiga aflagaadooyin galmada la xiriira
- taabashada aan la doonayn
- u-diididda galmada si ciqaab ah
- u-adeegsiga galmada si loo qasbo u-hoggaansanaanta
- in laga ceebeeyo ama la-yaso haweenka kuwaas oo codsada ama bilaaba galmada, ama ka hela raaxo ama rabitaan galmada
- in lagu khasbo inay daawadaan sawir-galmeed (pornography)
- in lagu khasbo inay rumaystaan in galmada, aan la ogoleyn ay tahay waajib diineed
- in loogu hanjabo in muwaadinimada ama deganaanshaha ay lumin doonto haddii aysan qancin baahida galmeed ee qof
- iyadoo lagu eedeeyo dhilleysi xagga waraaqaha sharciga ah.

*Anas ibnu Malik ayaa soo wariyey in Rasuulka Alle yiri:*

*'Midkiina yuusan ka dul dhicin xaaskiisa sida xayawaanka;*
*Laakiinse marka hore ha jiro fariinside idiin dhaxeeya.'*
*'Oo waa maxay fariin sidahaasi?'*
*Asxaabtiisa ayaa weydiiyey, wuxuuna ku jawaabay:*
*'Erayo iyo dhunkasho.'*

*Musnad al-Firdaws Of al-Daylami, 2/55*

## Xadgudubka iyo khasabka taraneed

*Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee nazariis guud iyo mid gaaraba Naxariista*

*Eebe waa kan idinka abuuray Naf kaliya, kana yeelay Xaggeeda Haweenaydiisii inuu weheshado*

*Al-A'rãf 7:189*

Noocan xadgudubka ah waxaa loola jeedaa ka-hortagidda haweenku inay xakameeyaan oo ay sameeyaan doonistooda u gaarka ah ee ku saabsan caafimaadkooda taranka. Tusaale ahaan waxaa ka mid noqon kara:

- in lagugu qasbo galmo aan ilaalsanayn si loo kordhiyo fursadaha aad uur ku yeelan karto taas oo ka soo-horjeeda doonistaada
- hanjabaadaha inaad baxaysid ilaa aad uur yeelato, ku hanjabida inaad ilmo u leedahay qof kale ama in la guursanayo haween kale haddii aadan u hoggaansamin
- xad-gudub jireed sababtoo ah inaadan ogolaan inaad uur yeelato
- faragalinta caburinta dhalmada si ula kac loogu keeno uur
- in lagugu qasbay inaad uur qaaddo ilaa mudo
- in lagugu qasbay in aad iska soo-riddo uurka oo ka dhan ah rabitaankaaga
- si ogaansho ah u-qaadsiinta cudurada galmada lagu kala qaado
- ka hortagga inaad iibsato kiniinka subaxda ka dib isu-tagga galmada aan la ilaalin
- in laga hortago in la qaato baaritaanka pap smears ama mammography
- ka hortagidda helitaanka daryeelka caafimaadka taranka.

## Xadgudubka ruuxiga ah

*Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee nazariis guud iyo mid gaaraba Naxariista*

*Dadka waxaa kamidah ruuc dhihi waxaan rumeynay Eeebe, marka lagu dhibo Eebe dartiisna ka yeela imtixaanka dadka cadaabka Eebe oo kale!*

*Al-'Ankabút 29:10*

Waxaa ku adkaan karta haweenka Muslimka ah qaarkood inay rumaystaan in fasiraadda diinta, mararka qaarkood, ay raggu u xeeladaystaan si ku habboon doonistooda. Haweenka kale ee muslimka ah, waxay ahayd wax ay marwalba ogaayeen. Intii ay Muslimiintu ka sii war helaanba taariikhdooda iyo caqiidadooda, Muslimiin badani waxay xaqiiqsadeen in diinta ay qiimeyso asluubta wanaagsan ee dadkeeda rumaysan wax ku saabsan jinsigooda, sinaantooda xagga awoodda, ixtiraamkooda xagga xakameynta, jacaylka xagga cadowsiga, roonaantooda xagga fara-xumaynta, iyo ugu dambeyn, dhammaystirnaanta xagga kala-sarraynta.

Xadgudubka ruuxiga ah ama diineed waa u-adeegsiga caqiidada diineed ama madhabeed si loo bannaysto rabshadda, iyo dhaqanka hanjabaadda iyo xakamaynta ah. Dabeecadahaas waxaa ka mid noqon kara:

- u-adeegsiga diinta si caadi looga dhigo, loo yareeyo ama loo difaaco xadgudub iyo rabshadda
- u-adeegsiga diinta si loo xakameeyo oo loo sheegto sarraynta xagga xidhiidhka; tusaale ahaan, nin inuu u adeegsado qaybo ka mid ah Qur'aanka ama Sunnah si xulasho ah si kor loogu qaado danihiisa gaarka ah
- in la siiyo macluumaad diimeed oo aan sax ahayn ama macluumaad diineed oo dhamaystirnayn oo kor u qaadaya keliya danaha iyo baahiyaha lamaanahaaga
- u-adeegsiga caqiidadaada diineed ama ruuxiyeed in loo adeegsado adiga lidkaaga
- ka-hortagidda xorriyadda doorashada ee caqiidadaada diineed ama ruuxiyeed
- ka hortagidda ama ku qasbiddada inaad xirato xijaabka
- ka hortagidda inaad ka qayb qaadato xafladaha dhaqaneed ama ruuxiyeed ama dhaqamada
- ku-qoslidda caqiidadaada diineed ama ruuxeed, ayadoo loo adeegsanaya caqiidadaada in lagu khiyaamo, ceebeeyo ama lagugu yaso
- ku qasbida caruurtaada in lagu koriyo caqiido aadan ogolaan
- ku-hanjabida ama ku-kaftanka in la guursanayo xaas kale
- guursiga badan (qaadashada in ka badan hal xaas)
- u-adeegsiga diinta si ay kuugu qasbaan in lagu sii qabo ayadoo dib loo dhigayo ama diidayo furiinka diimeed
- u-adeegsiga diinta si loo difaaco guurka yaraanta iyo / ama guurka khasabka ah.

# *Guurka ilmaha, guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah (CEFM)*

*Khansa Binti Khidam ayaa tiri:*

*Aabahay baa ii guuriyey… mana jeclaan dhigayga, saa daraadeed waxaan u cawday Rasuulkii Alle (Alle ha barakeeyo oo nabadgelyo ha siiyo).*

*Wuxuu igu yiri, 'Aqbal waxa aabahaa kuu qorsheeyey'.*

*Waxaan ku iri, 'Ma jecle inaan aqbalo waxa aabahay ii qorsheeyey'.*

*Wuxuu yiri, 'Ka dib guurkani sharci ma aha, orod oo guurso qofkaad jeceshahay'.*

*Fathul Bari Sharah Al Bukhari 9/194, Ibn Majah Kitabun Nikah 1/602*

*Si aad u fahanto sababta aan ugu darnay guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah ee buug-yarahan waxaa muhiim ah in la abuuro macnaha faham guud oo ku saabsan guurka, guurka ilmaha, guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah halkan Australia.*

### Waa maxay guurku?

Guurka halkan Australia waa isutag sharciyeed u dhexeeya laba qof oo:

- ugu yaraan 18 sano jir ah
- aan isqabin cid kale waqtigaas
- fahamsan waxa macnaha guurka yahay ayagoo si xor ah uu ogolaaday guurka.

Ayadoo aan loo eegayn waxa qofka jinsigiisa, asalkiisa, dhaqankiisa, cunsurkiisa ama diintiisa tahay ayaa sharciyadan khuseeyaan qof kasta halkan Australia.

## Waa maxay ogolaanshaha xagga guurka ah?

Sida kor ku xusan, ogolaanshaha waa mid ka mid ah shuruudaha ugu muhiimsan ee guurka. Ereyga oggolaanshaha waa hab kale oo lagu yiraahdo fasax. Waxay micnaheedu tahay in qofka guursanaya:

- uu si buuxda u fahamsan yahay in guurku uu dhacayo
- uu si buuxda u fahamsan yahay waxay xafladda guurku tahay
- uu ogyahay yahay cidda ay is-guursanayaan
- (tan ugu muhiimsan) inuu si xor ah u ogolaanayo, waafaqayo ama uu doonayo guurka.

Si uu guurku udhaco, ogolaanshahu waa inuu dhab yahay, taas oo macnaheedu yahay in qofku uu si dhab ah u fahmayo, u ogolaanayo ama uu doonayo guurka la sheegayo, oo uu xor u yahay inuu diido guurka iyadoo aysan cabsi jirin, haddii uusan ama aysan rabin inuu guursado, ama uu guursado/guursato qof gaar ah, ama beddeli karo/karto maskaxdiisa/da ka hor guurka.

Islaamku wuxuu u qeexayaa guurku inuu yahay qandaraas u dhaxeeya laba qof, oo ku galay ogolaansho. Ogolaanshahu waa mid muhiim u ah guurka Islaamka, sidaas darteed siinta ogolaanshaha waa qayb ka mid ah xafladda guurka Muslimka markaasna bixinta ogolaanshaha guurka waa inay ka markhaati kacaan kuwa noqonaya markhaatiga xafladda guurka.

Sida sharciga Australia, Islaamku wuxuu u heystaa ogalaanshaha inay tahay shuruud lagama maarmaan u ah guurka si loo aqoonsado.

Adeegsiga been abuurka, khiyaanada, hanjabaadaha, cadaadiska ama qasabka guurka waa wax ka soo horjeeda ogolaanshaha. Waxaa muhiim ah in la ogaado in xeeladahaasi sidoo kale yihiin astaamaha ugu waaweyn ee noocyada rabshadda qoyska.

## Waa maxay guurka ilmahu?

Guurka ilmaha waa guurka halka mid ama labada kaqeybgalayaasha ay ka yar yihiin 18 jir. Balse, guurka ilmaha ayaa hadda la fahamsan yahay in macnaheedu tahay guur khasab ah sababtoo ah caruurtu maahan caadifad ahaan ama dhimir ahaanba qaangaar ku filan inay bixiyaan ogolaansho la siinayo go'aan muhiim u ah sida guurka. Guurka ilmaha wuxuu ka soo horjeedaa sharciga halkan Australia iyo badiba dalal badan oo adduunka ah oo dhan ah, oo ay ka mid yihiin dalalka aqlabiyadda muslimka ah sida Algeria, Masar, Morocco, Tunisia iyo Eritrea.

Guurka ilmaha waxaa sidoo kale loo arkaa inuu yahay nooc ka mid ah xadgudubka ilmaha maaddaama sida badanaa ay ku lug leedahay hanjabaad, xabsi, rabshado, xadgudub caadifadeed, galmo la qasbay, uur la qasbay, iyo in lagu qasbay inay ka tagto dugsiga.

Halkan Australia, sharcigu wuxuu sheegayaa in qofka da'diisu ka yar tahay 16 sano aanay ku siin karin ogolaansho ah inuu/inay galmo la sameeyso qof weyn, sidaas darteed qof kasta oo qaangaar ah oo xiriir galmo la leh ilmo ka yar 16 jir waxaa lagu soo oogi karaa xadgudubka galmada. Ilmuhu ma soo food saari doono wax ciqaab sharciyeed ah.

## Waa maxay guurka yaraanta?

Guurka yaraanta waa marka qof dhalinyaro ah uu guursado qof weyn oo qaangaar ah; taas oo ah, da'da 18 ama wax yar kadiba. Tani waxay noqon kartaa rabitaan ama xoog.

Mararka qaarkood dadku waxay u isticmaalaan ereyga guurka yaraanta inuu yahay guurka ilmaha, laakiin buuggan yar waxaan ku samaynaynaa faraqa u dhexeeya labadaba mid cad sababtoo ah guurka ilmaha waa uu ka soo horjeedaa sharciga Australia marka guurka yaraanta (ugu yaraan ka dib da'da 18) uusan ahayn.

### Waa maxay guurka khasabka ah?

> *Aniga (runtii) layguma qasbin guurka, laakin waxaa i-qasbay oo i-cadaadiyey duruufta sababtoo ah waa waxaad sameyneyso. Waa habka uu u shaqeeyo dhaqankeenu …*
>
> *Nawal, Marrying Young, p. 10*

Guurka khasabka ah waa marka qof lagu sameeyo inuu guursado qof asagoon rabin; taas oo ah, iyadoo uusan jirin fasax ama ogolaansho. Taas macnaheedu waa abuurista xaalad qofka uu dareemayo inuusan lahayn wax doorasho ah, waa la xannibay, oo way ku adag tahay ama uma suurtogalayso inuu diido iyadoo aan wax ciqaab ah lahayn. Waxay kaloo macnaheedu noqon kartaa ku riixid qofka kaasoo aan wayneyn ama aan aan maskax ahaan awoodin (tusaale ahaan naafonimo nafsiyeed) inuu si buuxda u fahmo xaaladda oo uu bixiyo ogolaanshaha guurka.

Guurka khasabka ah wuxuu ka soo horjeedaa sharciga Australia. Maahana sidii guurka la qorsheeyey.

Hawenka iyo mararka qaarkood ragga, waxaa lagu qasbi karaa siyaabo badan, oo ay ka mid yihiin:

- ku qancinta jacayl macquul ah, maxabo iyo walaac
- in lagu qanciyo in guurka u fiican yahay qof kasta
- xoog toos ah oo ay ku jiraan xadgudub jireed, caadifadeed iyo nafsiyeed
- cadaadiska caadifadeed, hanjabaadaha, khiyaanada ama musuqid
- ka-takoorid ama diidmada qoyska iyo bulshada
- in loo sheego in diidmada guurka ay qoyskooda ceebaynayso waxyeelona u geysan karto qoyskooda
- in loo sheego in waalidku xaq u leeyahay inay guursadaan iyagoo aan waxna oggolaan
- in lagu qanciyo in guurka uu muhiim u yahay ilaalinta hiddaha dhaqankooda / diintooda, caadooyinka iyo xeerarka
- loo sheego in guurka uu yahay masuuliyadooda ama waajibaadka qoyskooda ku leeyahay
- ku dhiirigelinta waxyaalo soojiita iyo / ama ku laaluushka sida lacag badan ama ka xoroobidda xakamaynta adag ee waalidka, xoriyada inuu noqdo mid madaxbannaan ama raacda himilooyinkiisa
- Isticmaalidda xeeladaha cabsi-galinta ee ku saabsan cawaaqibka haddii guurka la diido, tusaale ahaan sida caafimaadka mid ama labada waalidba ay u saameynayso (oo ay ka mid tahay suurta galnimada wax is-yeelka).
-

### Qaababka kale ee guurka khasabka ah

*Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee nazariis guud iyo mid gaaraba Naxariista*

*Haddii Haweeney ka cabsato ninkeeda xaggiisa fogaansho ama jeedsasho dhib ma saarna korkooda hadday heshiiyaan heshiis, heshiiskaana khayr ah, waxaana lagu soo kulmiyey nafta bakhaylnimo.*

*An-Nisã' 4:128*

*Haddaad furtaan haweenka oy gaadhaan mudadooda uhaysta si fiican ama u siidaaya si fiican, hana u haysanina inaad dhibtaan si aad u xadgudubtaan, ruuxii fala sidaas wuxuu dulmiyey naftiisa.*

*Al-Baqarah 2:231*

Dalal badan oo muslimiin ah, haweenka Muslimka ah ayaa si sii kordhaysa u arka guurka khasabka ah uusan kaliya ahayn xaalad haweeney lagu qasbo guurka, hase ahaatee waxaa kale oo ay tahay xaalad haweeney loogu diidayo xaqa inay ka baxdo guurka iyadoo bilaabaysa habka furiinka. Halkan Australia, xaflad aroos ah oo Islaami ah (haddii uusan bixinin meheriyaha guurka oo diiwaangashan) iyo hab-raacyada furiinkuna malahan asaas sharci ah; Si kastaba ha ahaatee, haween badan ayaa si qalad ah u rumaysan in furiinka sharciga ahi uusan Islaami ahaan ku filnayn ayna ubaahan yihiin furiin 'islaam' ah si ay u dareemaan inay 'si buuxda u furan yihiin'.

Aragtidani waxay u oggolaanaysaa rag badan inay haweenka ku qasbaan inay ku jiraan xiriir guur aan la doonayn oo mararka qaarkood aan ammaan ahayn iyagoo ka-xanibaya ama udiidaya inay dumarka siiyaan furriin islaami ah. Sidan oo kale, haweenka waxaa la dhahaa inay ka noqdeen ogolaanshahooda si ay ugu sii-jiraan guurka iyo sidaas darteed guurka khasabka ah. Raggu waxay ku qasbaan haweenka inay ku sii-jiraan guurka iyagoo:

- udiida inay ku heshiiyaan inay ku kalaa-baxaan furiinka islaamiga ah ayagoo hor taagan imaam; Imaamyo badan oo xaaladdan oo kale ma bixiyaan furiin islaami ah
- udiida inay siiyaan furiinka 'islaamiga' ah haddii uusan helin haynta caruurta oo keligiis ah ama uu haysto dhamaan hantida qoyska

- inuusan ka qaybgalin habraaca imaamka; asagoo diidaya inuu bixiyo macluumaadka uu u baahan yahay imaamku si uu u soo saaro furiinka Islaamiga ah
- uhanjabida imaamada fududeeya furiinka haweenka iyadoo aanu jirin ogolaanshaha ninkooda
- raadinta imaamyada habraacyada furriinka kuwaas oo kaliya kala furi doona lammaanaha leh ogolaanshaha ninkooda
- sii-durkinta habraacyada furriinka Islaamiga ah sanado badan si uu u xaqiijiyo cadaadiska bulshadeed, nafsiyeed iyo dhaqaaleed ee haweenka taas oo ah qaab ciqaabeed u ah dhammeynta xiriirka
- ku qasbida haweenka inay bixiyaan 'hadiyado' si ay u ogolaadaan furiinka, sida bixinta deynta khamaarka ama qaadashada deyn dhaqaale.

Waxaa muhiim ah in la ogaado in dalalka Muslimka ah, sida halkan Australia, kaliya maxkamadaha ayaa soo saara furiinka ayadoo furriinadaas loo tixgeliyo inay Islaam ahaan qasab yihiin. Inkastoo maxkamadaha dalalka aqlabiyadda Muslimku ay ku daraan qaanuunka shariicada ee ku saabsan furriinka, waxay sidoo kale ku daraan qiyamka dhaqanka iyo caadooyinka ee la xiriira furiinka. Inkastoo aysan wada ahayn "furiinada Islaamka" hase ahaatee waxaa ku jira caadooyinka maxaliga ah iyo dhaqanka.

# *Saamaynta rabshada loo gaysto haweenka*

*Haweenku waxay labanlaab u yihiin ragga inay la kulmaan cabsi ama walaac ay sababtay rabshad ka timid lamaane hore.*

*Saameynta rabshada qoysku waxay noqon kartaa mid wax burburisa. Cilmi baaris ayaa lagu ogaaday in rabshada qoysku ay horseed u tahay dhimashada, iinta iyo jirrada haweenka Victoria oo da'doodu u dhaxayso 15-44 sano. saamaynta jireed ee rabshada qoyska ee haweenka waxay noqon kartaa jabab, muruxyo, goynta, lafaha kala-durka / jaban, maqalka ama aragga oo luma, dhicinta ama dhalid horreysa, cudurrada galmada lagu kala qaado, isdaldalidda iyo dhimashada.*

Waxaa intaas dheer, rabshada qoysku waa mid ka mid ah sababaha ugu wayn ee guri la'aanta ee haweenka Muslimka ah iyo carruurta ee ku nool Victoria.

Haweeney kasta oo la kulanta xadgudub ayaa si xun loo saameeyaa. Nooca iyo xoogga saamayntan way ukala duwan yihiin qof illaa qof waxayna ku xiran tahay duruufahooda gaar ahaaneed. Dareenka guud ee haweenka waxaa ka mid ah:

- isku-eedeynta naftooda xadgudubka
- diidmada - dabeecada iska yeelyeelka maaha mid dhabtii xadgudub ah
- caadi iska-dhigidda ama yaraynta - rumaysashada inay caadi ka tahay xiriirada ama in xadgudubku uusan dhab ahaan ahayn mid khatar ah
- ucudurdaarida ama cafinta xadgudubka
- cabsiin / argagixin
- xanaaq / caro
- ceeb
- ka-go'doominta mujtamaca iyo bulshada.

Saamaynta la diiwaangeliyey ee rabshada qoyska ee ku saabsan caafimaadka iyo samaqabka haweenka waxaa ka mid ah:

- buufiska
- walaaca, weerarada argagaxa
- khalkhalka walbahaarka qaxarka ka dib
- khalkhalka cunto xumida
- khalkhalka hurdada
- dhibaatooyinka jireed ee la xidhiidha walbahaarka, tusaale ahaan. madax xanuun, xanuun joogto ah, dhibaatooyinka dhiig-karka
- dhibaatooyinka galmada iyo taranka
- ku tiirsanaanta daroogooyinka / daawooyinka sida kiniiniga hurdada, xanuun joojiyaha
- wax-is-yeelidda, fikirka ama dabeecadda isdilka
- luminta isku-kalsoonida iyo qabka; gargaar la'aanta.

Saamaynta la diiwaangeliyey ee rabshada qoyska oo ku saabsan xiriirada guurka waxaa ka mid ah:

- awood darrida inay si macquul ah wax uga qabataan baahida carruurta
- ku-adkaanta waalidnimada sababtoo ah walbahaarka caadifadeed iyo nafsiyeed
- ku-adkaanta haysashada / lumitaanka xidhiidhada dhow
- ku tiirsanaanta dadka kale
- ku qabida kalsooni la'aanta dadka kale
- dareenka in laga tagey
- la'aanta kartida inuu noqdo mid hadal cad
- gardarrada aan loo meel dayin ee lagula kaco carruurta iyo xubnaha kale ee qoyska ama asxaabta
- xiriir xumada carruurta iyo dadka kale ee aad jeceshahay.

Haweenka Muslimka ah ee u soo haajirey Australia oo ku jira nidaamka isku dayida inay degaan ayna la qabsadaan dalkooda cusub, rabshada qoysku waxay si weyn u yareeyn kartaa awooddooda si ay u daboolaan dhammaan caqabadaha degidda wadan cusub; helida guri, helida shaqada, barashada Ingiriisiga iyo la qabsashada filashooyinka cusub ee bulshada iyo dhaqaalaha ayaa noqda midaan suurtagal ahayn.

# *Saamaynta rabshadda qoyska ku leedahay carruurta*

*Carruurta, xitaa marka aaney dhibbanayaasha tooska ah ahayn, waxaa saameeya iyagoo arka rabshada qoyska. Tani waxaa lagu muujiyay inay khuseyso xitaa marka aysan carruurtu joogin isla qolka ay rabshadu ka dhacdo. Iyadoo ku xiran da'dooda, waxay u badan tahay inay siyaabo kala duwan uga falceliyaan. Waxay isku dayi karaan inay joojiyaan rabshada, ama laga yaabee inay iska-daayaan oo dareemaan caatiba waa iyo gargaar la'aan. Sababtoo ah waxa ay ku arkeen qoyska dhexdiisa, carruurtu waxay yeelan karaan dhibaatooyin badan oo caadifadeed, dabeecadeed, korriimeed, ama dhibaatooyin tacliimeed, kuwaas oo qaar ka mid ah ay ku sii kori karaan qaangaarkooda. Saamaynta badan waxaa loo kala saari karaa qaybaha da'da carruurta.*

Dhallaanku waxay dareemi karaan / muujin karaan:

- khalkhal hurdo iyo quudin-xumo
- walwal joogto ah iyo oohin
- awood darro in loo raaxeeyo
- u nuglaanta in si sahal ah looga caraysiin karo ama loo bajin karo

Kureyada / ardayda malcamadda waxay la kulmi karaan / muujin karaan:

- cabashooyinka jireed ee soo noqnoqda
- dhibaatada hurdo la'aan ama qaraw badan
- xanaaq joog ah
- dabeecad xumo
- ayagoon ogeyn sida ama waqtiga la ciyaaro
- murugo guud
- dhaqan naxariis darro ah ee carruurta iyo dadka waaweyn.

Carruurta da'da dugsiga ah (marka lagu daro astaamaha ay la kulmaan Kureyada) waxay la kulmi karaan / muujin karaan:

- dhibaatada xoog-saarista ama raacidda tilmaamaha
- awood-darida inay dhamaystiraan hawlaha shaqada guriga; hoos u dhaca waxqabadka dugsiga
- xishood badan ama cabsi weyn ee dadka waaweyn
- dabeecadaha durugsan sida sida suulka, nuugista, awood la'aanta in la xakameeyo kaadida
- xoog-sheegashada, dhaqanka guud 'dhaqdhaqaaqa', gardarrada, rabshada
- u janjeerka inaad ka farxiso dadka kale iyo ka fogaanta wixii khilaaf ah ee guriga
- buufis iyo / ama ka go'doon.

Qaangaarku waxay la kulmi karaan / muujin karaan:

- buufis, caro, xanaaq (gaar ahaan mid ama labada waalidba)
- dabeecada wax-burburin ah ama isdaldalaad ah
- cabashooyinka jireed ee soo noqnoqda
- xadgudubka daroogada iyo / ama khamriga
- dabeecada xun sida burburinta alaabta, xatooyada
- naxariis darrada uqabo xayawaanka, caruurta yaryar, faca jinsiga ka duwan
- cararida
- dabeecad dagaal / xadgudub / rabshad leh; isticmaalka hubka
- dabeecadda halista galidda
- buufis, walaac
- khalkhalka hurdada
- khalkhalka cunidda cuntada
- ka go'doomidda ka-qaybgalka arrimaha bulshada ee asxaabta ama qoyska
- isku kalsoonaanta hooseysa
- xushmad darrada midkood (dhibbanaha ama dembiilaha) ama labada waalidba
- aqbalida rabshada xiriirka guurka.

# *Saamaynta rabshadu ku leedahay qoysaska*

Waa wax caadi ah in la rumaysto in rabshadu kaliya ay saameyneyso qofka lala beegsaday, iyo in saameynta rabshada kaliya la dareemayo isla markiiba. Hase ahaatee hadda waxaan ognahay in rabshadu saamayn ku leedahay dhammaan kuwa arka. Waxay leedahay saameyno mudo dheer ah oo awood u leh inay waxyeeleeyaan sida xubnaha qoysku isula xiriiraan midba midka kale iyo inay si weyn u saameyso caafimaadka iyo samaqabka.

Saamaynta weyn ee qoysaska waxaa ka mid ah:

- jawi cabsi ah
- caadiyaynta rabshada
- barashada la-qabsiga xirfadaha aan habooneyn iyo wada-hadalka
- dayacidda baahiyaha caadifadeed
- go'doomin/ceebayn/cadaadis si loo ilaaliyo sirta
- xidhiidhada qoyska oo kala dhantaalan oo aan caafimaad lahayn. Tusaale aad u ilaalis badan ama u tartan badan
- maqnaanshaha/waqtiga qoyska ee tayada xadidan.

# Saamaynta guurka ilmaha, guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah

*Waqtigii aan guurka jebiyey waxaan ku soo gaadhay bilooyin go'doon. Hooyaday ilamaba hadli jirin aniga ayadoo qoyskayaguna way walaacsanaayeen, wayna iga dheeraadeen. Waxay igu noqotay inaan dareemo inaan ahay qof aad u xun.*

*Amal, Marrying Young, p.10*

*Waxaan qabaa dhibaatoyin jilibka, dhibaatooyinka dhabarka iyo sonkarowga. Ilmahaygii ugu horreeyey wuxuu ahaa shan bilood markii aan mar kale uur qaaday, weli waxaan ahay ilmo.*

*Waan xanuunsanahay oo waan niyadjabsanahay. Waxaan qabaa dhibaato wadnaha ah. Hadda waxaan ka xanuunsanahay dhabarka taasoo ka dhalatay ilmaha iyo guurka. Waxaan la kulmay dhibaatooyin intii aan uurka kowaad ku jiray.*

*Zahra, Marrying Young, p. 12*

*Waxaan weli ka baranaa haweenka wax ku saabsan saameynta guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah. Halkan Australia gudeheeda, haweenka yaraanta isu guuriyay ama lagu qasbay guurka khasabka ah waxay soo sheegeen saameyn taban oo ah mid caadifadeed iyo mid nafsiyeed oo mudo dheer ah, oo ay ku jiraan dareenka luminta, xanaaqa, carada, diidmada iyo murugada. Hooyonimada yaraanka waa mid ka mid ah saameynta ugu xun ee guurka ilmaha iyo waddamada qaarkood waxay u horseedi kartaa dhimashada hooyada dhallinarada ah inta ay ku jirto dhalmada, iyadoo tani aanay caadi ahaan uga dhicin Australia, saameynta jireed ee xun ee dhalmada jirka da'da 'yar qasab waxba caadiyan kama qabanayso daawada casriga ah. Jirarka aan korin diyaar uma ahan caqabadaha umusha.*

Kuwa yaraanka ku guursaday ama ah dhibbanayaasha guurka ilmaha ayaa ah halis dheeraad ah ugu jira:

- buufiska
- walaaca
- howlaha galmada yaraanta / qasabka ah
- uurka iyo dhalmada yaraanta / qasabka ah
- cudurada galmada lagu kala qaado
- arimaha caafimaadka ilmaha iyo hooyada ee daran
- ka-goosashada khalkhalka ama degdega ah ee waxbarashada
- shaqo yari iyo shaqo la'aanta
- saboolnimada
- hoos u dhaca qabka iyo is-kalsoonida
- adkaanta go'aan gaarista
- adkaanta waalidnimada
- rabshada qoyska
- kufsiga iyo noocyada kale ee xadgudubka galmada.

Isku-gaynta arrimaha caafimaadka jir ahaaneed ee suurtagalka ah, walaaca nafsiyeed, waxbarashada xadidan, dhibaatooyinka dhaqaale iyo suurtogalnimada khilaafka/rabshada qoyska ayaa haweenka da'da yar ugaysta xaalad dulmanaan oo saameyn weyn ku leh noloshooda oo dhan.

# *Macnaha isbeddelka: Su'aalaha muhiimka ah qaarkood*

## Rabshadda qoysku ma wax ku saabsan baa dhaqanka mise diinta?

Rabshada qoysku waa dhibaato caalami. Cilmi baaris ayaa muujinaysa in rabshada qoysku ka dhacdo waddan kasta iyo bulsho kasta oo adduunka oo dhan ah. Rabshada qoyska, guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah iyo rabshada loo gaysto haweenka guud ahaan waxaa saameyn ku yeelan kara dhaqanka diinta, ilaalinta dhaqanka, gobolka aduunka ee aad ka timaaddo ama xaalada dhaqaale-bulshadeed.

Dhaqanka iyo diinta waxaa inta badan adeegsada kuwa gardarrada wata si ay qiil ugu helaan rabshadahooda ama ka fogaadaan masuuliyadaha arintaas, hase ahaatee taasi macnaheedu maahan in dhaqanka iyo diintu ay sababaan ama taageeraan rabshadaha. Rabshada guriga, sida rabshada ka baxsan guriga, waxay ku saabsan tahay awoodda, xakamaynta iyo xukunka. Waxay inta badan lala xiriirtaa ragga awood badan ku leh bulshada dhexdeeda marka loo eego haweenka.

Buug-yarahan oo dhan, waxaan ku soo darnay Aayadaha Quraanka iyo Xadiiska kuwaas oo ka tarjumaya meeshu ka taagan yahay Islaamku xiriirada ka dhexeeya ragga iyo haweenka iyo mucaamalada laga filayo ragga ee xagga haweenka. Marka dib loo eego shaqada culimada muslimka, waxaa cad in Islaamku uusan qiil u hayn mucaamaulada xun ula dhaqanka haweenka ama carruurta.

## Maxay raggu u adeegsadaan rabshada ka dhanka ah qoysaskooda?

Cilmi-baaris laga helay adduunka oo dhan waxay muujinaysaa in raggu ay adeegsadaan rabshada maxaa yeelay waa dabeecad la bartay. Ragga adeegsada rabshada waxay sidaas u sameeyaan sababtoo ah waxay si guul ah u adeegsaden rabshadaha si ay u helaan awood iyo xakamayn waayihii hore mana jirto cid iyaga ka joojisay inay adeegsadaan. Waxaa laga yaabaa in lagu soo koriyey qoysaskii kalkaas oo rabshadaha loo adeegsadey si loo xalliyo khilaafaadka iyo is-diida, ama laga yaabo inay ka soo barteen dabeecada meel kale.

Rabshadu maahan dabeecad caadi ah oo aysan raggu xakamyn karin. Tani waa khuraafaad. Ragga intooda badani ma rabaan inay rabshada u adeegsadaan lamaanahooda xitaa marka ay ku jiraan walbahaarka, wareerka, xanaaqa ama ay saamaynayso khamrigu.

Rabshadu maahan mid lagaa careysiiyo. Had iyo jeer waa masuuliyadda dembiilaha, maxaa yeelay wuxuu awood u leeyahay inuu doorto sida uu u dhaqmayo.

## Maxay u dhacaan guurka ilmaha, guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah?

*Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee nazariis guud iyo mid gaaraba Naxariista*

*Naf waxayna awoodin laguma dhibo, hooyo ilmaheeda dartiis, ama aabe ilmihiisa dartiis.*

*Al-Baqarah 2:233*

Muslimiinta Australia, guurka ilmaha, ama guurka qangaarka iyo caruurta da'doodu ka yar tahay lix iyo toban jir waa dhif iyadoo badiba Muslimiintu ay aaminsan yihiin in guurka noocan ahi uu noqon karo xadgudubka ilmaha. Si kastaba ha ahaatee, waxaa weli jira sababaha ay qoysasku qaarkood rumaysan yihiin in cadaadiska loo adeegsado, iyo xitaa xoog, gabdhahooda inay yaraanka ku guursadaan, ay ugu dambeyntii faa'iido u tahay daryeelka ilmahooda iyo qoyskooda. Hase ahaatee hadda waxaan ognahay in marka guurka yaraanta ama guurka qasabka ah loo gaysto haweeney da 'yar, waxay gelinaysaa halista xadgudub dheeraad ah iyo noocyada kale oo dulmanaan ah. Ayadoo ay sii kordhayso, cilmi-baarista iyo waaya-aragnimooyinka haweenka ayaa muujiyay in nolosha la waxyeeleeyay, mararka qaarkood uu baabi'yey, guurka khasabka ah iyo guurka yaraanta, iyo in guurka la qasbo uusan keenayn faa'iidooyinka ay waalidiintu isku dayeen inay gabdhahooda u hubiyaan.

Sababtoo ah waxaan hadda ognahay cawaaqibta dhici kara ee guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah, ma ilaawi karno saameynta ay ku leeyihiin nolosha haweenka. Tani waa sababta dalalka adduunka oo dhan u arkaan in dhaqankaas aanu la mid ahayn kii sharfidda dhaqankii hore ama dhaqanka diinta, laakiin waa nooc ka mid ah rabshadaha ka dhanka ah haweenka.

Ugu dambeyntii, guurka ilmaha iyo guurka khasabka ah, sida noocyada kale ee rabshadaha qoyska, waxay ku xiran yihiin heerarka haweenka iyo ragga ku leeyihiin bulshadaas. Awoodda ay raggu ka hayaan nolosha haweenka waxay u oggolaanaysaa inay xakameeyaan dabeecada haweenka iyo gabdhaha, rabitaankooda iyo go'aamadooda iyo inay u adeegsadaan xoog iyo rabshad iyaga ka dhan ah.

## **Ma dhibaato bulshadeed baa mise waa arrin qoyseed?**

*Alle Rasuulkiisa (NNKA) wuxuu yiri, 'Caawi wallaalkaa haddii gardaran yahay iyo haddii laga gardaran yahayba'.*
*Nin baa yiri, 'Rasuulkii Allow (NNKA)! Waan caawinayaa haddii laga gardaran yahay, laakiinse haddii uu gardaran, yahay sidee baan u caawiyaa?'*
*Nabigu (NNKA) wuxuu yiri, 'Adoo ka hortegaya inuu ku gardaroodo (kuwa kale), taas ayaa ah sidii aad u caawin lahayd.'*

*Sahih al-Bukhari 6952*

*Rabshada ka dhanka ah haweenka iyo caruurtooda waxay keenaysaa kharashyada shakhsi ahaaneed, dawladeed iyo ganacsiyeed.*

Jaaliyadaha Muslimiinta, iyo bulshooyinka adduunka oo dhan, haweenku waxay sii wadaan inay asaasiyan masuul ka ahadaan waalidnimada, kobcinta iyo waxbarashada carruurta. Iyada oo loo marayo daryeelka iyo korinta carruurta, haweenku ma ahan kaliya inay iskuhayaan qoysaska iyo bulshooyinka, hase ahaatee sidoo kale waxay bixiyaan oo qaabeeyaan jiilasha mustaqbalka ee bulshada.

Sidaa darteed, haweenkoodu waxay yihiin iyo waxa kaga dhacaya guryahooda waxay ka muuqan doonaan carruurta ay koriyaan iyo bulshooyinka ay abuuraan.

Bulshooyinku waxay ka samaysan yihiin xiriiro taxaneah. Waxa ka dhacaya guryahayaga waxay u gudbaan dugsiyada, goobaha shaqada, iyo hay'adaha kale. Xadgudubka qof haween ah wuxuu ugudbaa xubin ka mid ah qoyska ilaa mid kale – laga bilaabo hooyada ilaa ilmaha, walaalaha ilaa walaalaha, iyo dhammaan qoysaska isku dhow iyo qoysaska mustaqbalka. Fahamka sidan ah, rabshada ka dhanka ah haweenka guriga dhexdiisa looma arki karo keliya arrin qoys oo gaar ah.

Badiba heerka asaasiga ah, haweenku waa kala badhka dadweynaha. Hoos-u-dhaca ku yimida xaaladda darajada iyo samaqabka haweenka wuxuu cawaaqib ku leeyahay bulshada oo dhan. Sidaa darteed, rabshada qoyska waa shaqada qof kasta.

Saamaynaha la diiwaangeliyey ee rabshada qoysku ku leedahay bulshooyinka waa:

- si xun ula-dhaqanka joogtada ah ee haweenka
- sii-xoojinta iyo caadiyaynta rabshada
- sii wadida wareega rabshada
- qabka hoose ee haweenka
- xiriirada jinsiga ee aan sinnayn
- xooga-shaqaalaha wax soo saarka oo kooban
- horumarka dhaqaalaha oo kooban.

## Maxaan ugu eedeyneynaa haweenka rabshadaha ka dhanka ah iyaga?

*Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee nazariis guud iyo mid gaaraba Naxariista*

*Kula noolaada si fiican hadaad ka hataan, waxaa suurowda inaad kahataan wax uu yeelo Eebe dhexdiisa khayr badan.*

*An-Nisã' 4:19*

Waa wax caadi ah in haweenka lagu eedeeyo xaaladaha rabshadaha qoyska, iyo iyagoo ay aad u badan tahay in la rumaysto in haweenka dhallinyarada ah oo aan dooneyn inay guursadaan qof ay waalidkood udooreen aysan garanayn waxa iyaga u wanaagsan. Badanaa haweenka ayaa lagu eedeeyaa inay kiciyaan rabshada lammaanahooda ama rabshada waalidkooda. Haddii ay talaabo qaadaana, waxaa badanaa lagu eedeeyaa inay dumiyeen qoyska. Haddii ay aqbalaan rabshadana, waxaa badanaa lagu eedeeyaa inay sii wadaan, gaar ahaan haddii ay saameynayso carruurta.

Haweenka qaarkood waxay dareemaan iska daa wax ay qabtaane, waa la eedeyn doonaa.

Ma jiro qof bini'aadan ah – qof weyn ama ilmo – oo doonaya ama u qalmaa in lagu xadgudbo ama in sharafta asaasiga ah ee go'aan ka gaarista noloshooda laga qaado. Ma jiro qof bini'aadam ah oo aanay saamaynayn xadgudubka ay la kulmaan. Ma jiro qof bini'aadam ah si caqli-gal ah isaga qaadaya sharaftooda, dhowrsanaantooda, xushmadooda, iyo dareenkooda ammaanka jidheed iyo caadifadeed iyo samaqabkooda.

Sameynta go'aanka ku saabsan waxa la sameeyo si looga jawaabo rabshada ka timaada qof aan jecelnahay waa wax aad u adag. Tani gaar ahaan waa haddii haweenku u baahan yihiin inay tixgeliyaan ammaanka carruurtooda ama marka xadgudubku ka yimaado waalidkooda.

Inta badan waxaa jira fikrado khaldan oo ka dhexjira bulshooyinka inay tahay bixitaanka dhibbanaha, ee aysan ahayn rabshada gardaranaha tan burburinaysa qoyska oo waxyeellada ukeenaysa bulshada. Waxaa si cad mas'uuliyadda qoysaska burburay iyo bulshooyinka kala jajabay waxay u saaran tahay kuwa geysta rabshada iyo xadgudubka – sababtoo ah waxay had iyo jeer doortaan inay u dhaqmaan si ka duwan wanaagga.

In lagu eedeeyo haweenka xadgudubka ay la kulmaan – ama doorasha in ay ka baxsadaan – ayaa lafteedu ah nooc xadgudub ah, midka aan gaysano anagoo matalayna danbiilaha.

# *Guurka, rabshada iyo xuquuqda aadanaha*

Hadda waxaa si fiican loo aqoonsan yahay adduunka oo dhan, oo ay ka mid tahay Australia, in guurka ilmaha/guurka khasabka ah iyo rabshada qoyska ay ka soo horjeedaan xuquuqda aasaasiga ah ee haweenka. Xuquuqda asaasiga ah ee nabadgelyada iyo doorashada waxaa lagu qoray Universal Declaration of Human Rights (Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha) (1948) iyadoo Qaramada Midoobeyna ay ku soo qaaday guurka ilmaha / guurka khasabka ah iyo rabshada qoyska heshiisyo gaar ah, gaar ahaan Convention on the Elimination of Discrimination against Women (Heshiiska ku saabsan Takoorka ka dhanka ah Haweenka) (CEDAW) kaas oo lasoo saaray 1994. Wadamo badan, oo ay ku jirto Australia, iyo kuwa kale oo guurka ilmaha / guurka khasabka ah ay ku badan yihiin, waxay saxeexeen kan waxaana waajib ku ah inay ka ilaaliyaan haweenka iyo gabdhaha rabshada, xooga iyo guurka ka hor waqtigooda.

Guurka ilmaha / guurka khasabka ah waxaa sidoo kale lagu soo qaaday qayb ka mid ah Child Rights Convention (Heshiiska Xuquuqda Ilmaha) (1990) kaas oo si gaar ah diiradda u saaraya samaqabka carruurta, oo ay ku jiraan xuquuqdooda u leeyihiin caafimaadka iyo waxbarashada. Sannadkii 2013 United Nations Human Rights Council (Golaha Xuquuqda Aadanaha ee Qaramada Midoobay) ayaa sidoo kale qaatay go'aan gaar ah oo ka dhan ah ilmaha, iyo guurka yaraanta iyo kan khasabka ah.

## Guurka xagga Islaamka

Aayado badan oo Quraanka ah, Ilaah wuxuu si siman ula hadlaa ragga iyo haweenka, sida aadanaha u siman: xaga qiimaha, ruuxa iyo waajibaadkooda Alle. Qur'aanka kariimka ah wuxuu ragga ku amrayaa inay si wanaagsan ula dhaqmaan haweenka, wuxuuna si adag u cambaareeyaa ragga ku xadgudba xuquuqda haweenka.

Quraanka waxa ku jira aayado badan oo amaanaya habka dhaqanka habboon ee haweenka marka loo eego xaaladda guurka iyo xuquuqda haweenka inay dabaqaan xuquuqdooda iyo waajibaadkooda sida ragga u shaqeeyaan. Aayado dhowr ah ayaa si gaar ah u dhiirigeliya naxariista la siiyo haweenka; Aayado kale waxay cadeynayaan in xidhiidhka ka dhexeeya ragga iyo haweenka inuu yahay mid naxariis ah, ixtiraamka la wadaago, iyo daryeelidda, wuxuu tixraacaa jawiga loo qoondeeyey naxariista la wadaago iyo raxmadda ka jirta guurka guriga. Xiriirka guurka ee Qur'aanka iyo Sunnah waxaa lagu sharraxay sida saaxiibtanimada, jacaylka, naxariista, raxmadda, degganaashaha, xasiloonida iyo wadaagidda culeyska nolosha qoyska.

Quraanka kariimka ah iyo Sunnah ayaa naqdiya si xun ula dhaqmidda haweenka ee ragga. si xun ula dhaqmidda noocan oo kale ah waxaa ka mid ah: rabshada; haysashada haweenka furriinka ka dib si ay u waxyeeleeyaan; iyo si ula kac ah u keenida haween inay ku noolaadaan cabsi, xadgudub galmo iyo guurka khasabka ah.

Hase ahaatee laga yaabee in mid ka mid ah doodaha ugu adag ee xidhiidhada macnaha iyo ixtiraamka leh ee u dhexeeya ragga iyo haweenka waa dhaqanka Nabiga (PBUH) naftiisa; wuxuu neceb yahay rabshada loo geysto haweenka, waligiisna uma gaysan nooc kasta oo rabshad ah haweenka.

# *Raadinta taageerada: Waa tallaabada kowaad ee muhiimka ah*

Waxay qaadan kartaa wakhti dheer si ay u fahmaan iyo inay aqoonsadaan qofka khibradiisa rabshada. Waxay ku qaadan kartaa haweenka wakhti dheer si ay u ogaadaan dabeecada lammaanahooda ama dabeecada waalidkooda waa rabshad qoys.

Haweenka la dhaqmaya nimanka xadgudubka iyo rabshada badan, horay uga socdka waxay dareemayaan dhib badan markay la kulmaan dareenka inay ka fogaadaan xiriirka iyo saameynta ay ku leedahay naftooda iyo carruurtooda, welwelka hoyga iyo guri la'aanta, ama jawaab-celinta qoyskooda ama bulshadooda.

Sidoo kale, haweenka/gabdhaha da'da yar oo qoysaskoodu ku cadaadinayaan guurka waxaa laga yaabaa inay dareemaan jahwareer iyo cabsi ku saabsan sida loogu jawaabo, gaar ahaan haddii qoysku yahay mid daryeel iyo jacayl leh oo udoonaya wax fiican carruurtooda oo aan adeegsanayn xoog jidheed.

Tani waa sababta arrimahan ay si qoto dheer shakhsi u yihiin waxaana ku lug leh qoyska iyo kuwa la jecel yahay. Xitaa marka xadgudubku uu cad yahay, u nistaagidda iyo ka qaadista tallaabo lid ku ah lammaanahaaga ama xubnaha qoyskaaga waa mid dhib badan. Waxay noqon kartaa mid waxtar leh oo muhim ah, sidaas darteed si loola hadlo dadka, haddii uu yahay saaxiib sax ah ama xubin qoyska ah, ama shaqaale xirfadle ah oo khibrad u leh howlahaan. Tani waa tallaabada koowaad oo muhiimka ah.

Intaas waxaa dheer, helitaanka macluumaadka ku saabsan khayaarada kala duwan oo la heli karo waxay ka caawin kartaa haweenka inay sameeyaan go'aan wargashan oo ku saabsan waxa la sameeyo si ay naftooda iyo carruurtooda u badbaadiyaan. Wixii go'aan ah ee haweenku sameeyaan, waxaa muhiim ah inay helaan xogta iyo taageerada saxda ah.

Waxaan ku darnay liiska adeegyada oo siin kara noocyada kala duwan oo caawimaada ah. Liiskani maahan mid dhamaystiran oo waxaa loogu talagalay inuu kaa caawiyo inaad si fudud wax u bilowdo.

Waxaan qirsanahay in raadinta caawimadu noqon karto khibrad qallafsan. Waxaan halkan u joognaa inaan ku siino taageero qarsoodi ah iyo adeega kaa caawinaya macluumaadka ama helitaanka adeeg ku habboon baahidaada.

## Free Translating and Interpreting Service (Adeegga Fasiraada iyo Turjumidda lacag la'aanta ah) (TIS)

Adeegga turjumaanka lacag la'aanta ah ee loogu talagalay dadka aan ku hadlin Ingiriisiga ayaa la heli karaa si loo helo adeegyada ugu badan:

1. Ka wac TIS taleefanka 131 450 oo waydiiso in lagugu xiro adeegga aad u baahan tahay ee luqadda looga baahan yahay.
2. TIS waxay kugu xiraysaa adeegga waxayna ku siinaysaa turjumaan lacag la'aan ah

Wax badan ka hel: www.tisnational.gov.au

# Adeegyada Taageerada (Victoria)

Waxaa jira adeegyo fara badan oo ku saabsan Victoria kuwaas oo taageeri kara haweenka si ay u sameeyaan go'aano wargalin ah. Adeegyadan waxay ku siin karaan macluumaad si ay kaaga caawiyaan inaad gaarto go'aanka iyo inay kaa caawiyaan baahidaada degdegga ah sida taageerada iyo la-talinta, gargaarka sharciga iyo degaan ammaan ah. Shaqaalaha adeegyadani waxaa loo tababaray inay ku dhagaystaan ayagoo aan ku xukumin oo qarsoodi ah. Go'aanka kama dambaysta ah ee ku saabsan waxii tallaabo ah adigay kugu xiran tahay.

## Adeegyada waqtiga qalalaasaha

### Booliiska ama ambalaaska

Maareynta xaaladaha degdegga ah, amniga iyo halista. Ka-Jawaabida watiga qalalaasaha, dareenka amniga, jawaab gaar ah oo ku saabsan arrimaha sharciga iyo kala dambeynta.

Degdegga wac 000

Rugaha degaanka ah iyo qaybaha takhasuska leh

www.police.vic.gov.au/content.asp?Document_ID=7

### Safe Steps

Adeegga taageerada taleefanka 24saac. Taageerada watiga qalalaasaha, Qorsheynta Nabadgelyada, Hoyga waqtiga qalalaasaha ee loogu talagalay dadka la kulma rabshada qoyska.

Taleefanka 1800 015 188

www.safesteps.org.au

safesteps@safesteps.org.au

### Australian Federal Police (Booliiska Federaaalka Australia) (AFP)

Haddii aad tahay qof dhibane guurka khasabka ah / ama guurka yaraanta ama aad garanayso qof sidaas ah la xiriir AFP taleefanka 131AFP (131 237) ama u dir email AOCC-Client-Liaison@afp.gov.au

Or online reporting: forms.afp.gov.au/online_forms/human_trafficking_form

### Lifeline

Taageerada waqtiga qalalaasaha iyo adeegyada ka-hortagga is-daldalida

Taleefanka 13 11 14

### Child Protection Crisis Line (Khadka Qalalaasaha ee Child Protection)

Si aad u soo sheegto dareenka ku saabsan amniga deg dega ah ee ilmaha ee gudaha qoyskooda, 24 saac, 7 maalmood asbuuciiba

Taleefanka 13 12 78

Wixii waxweydiin guud ah la xiriir adeegyada degaanka providers.dhhs.vic.gov.au/making-report-child-protection

### Victorian Centre Against Sexual Assault (Xarunta Victoria ee Ka-hortaga Xadgudubka Galmada)

Taageerada qalalaasaha, La-talinta, Macluumaadka loogu talagalay dadka loogu xadgudbey galmada ayagoo ah dad qaangaar ama carruur ah.

Taleefanka 1800 806 292 or 9635 3688

# Adeegyada taageerada rabshada qoyska

**Ogsoonow:** Adeegyada taageerada rabshada qoyska waxay sidoo kale ku siin karaan caawimaad haddii aad halis ugu jirto guurka yaraanta iyo guurka khasabka ah

## The Australian Muslim Women's Centre for Human Rights (Xarunta Haweenka Muslimka ee Australia ee Xuquuqda Aadanaha)

Wixii caawimaad ah ee helitaanka adeegyada, udoodida iyo gudbinta. Isniinta ilaa Jimcaha 9:00 am ilaa 5:00pm. Teleefanka (03) 9481 3000 ama ausmuslimwomenscentre.org.au

## InTouch – Multicultural Centre Against Family Violence (Xarunta Dhaqanada-badan ee Ka-hor-tagga Rabshada Qoyska)

Taageerada kayska ee rabshada qoyska ee takhasuslaha, taageerada sharciga iyo socdaalka

Teleefanka (03) 9413 6500 ama 1800 755 988
ama ka eeg www.intouch.org.au

## Women's Information and Referral Exchange (Adeegyada Gudbinta iyo Caawimaadda Dhibanaha)

Macluumaadka, taageerada iyo u gudbinta haweenka.

Teleefanka 1300 134 130 (9:00am ilaa 5:00pm).

Xarunta Macluumaadka Haweenka: 210 Lonsdale Street, Melbourne.
10:30am ilaa 5:00pm Isniinta ilaa Jimcaha ama www.wire.org.au

## Victims Referral and Assistance Service

Waxay siisaa dhibbanayaasha dembiga helidda la-talinta, u-gudbinta adeegyada taageerada iyo macluumaadka ku saabsan caawimaadda sharciga iyo maaliyadda.

Teleefanka 1800 819 817

# Domestic Violence Outreach Services (Adeegyada Outreach ee Rabshada Guriyeed)

Adeegyadani waxay caawiyaan haweenka iyo caruurta kuwaas oo u adkaysta rabshada qoyska, ama ka baxsanaya lamaanaha rabshoolaha ah. Waxay siiyaan taageero wax ku ool ah iyo macluumaad ku saabsan ikhtiyaarrada deegaan oo ammaan ah, helitda talo sharciyeed, helitda xuquuqda dhaqaale, ugudbinta la-talinta iyo adeegyada kale. Shaqaalaha taageerada si gaar ah loogu talagalay carruurta ayaa laga heli karaa adeegga degaankaaga.

### Metropolitan Domestic Violence Outreach Services (Victoria) (Adeegyada Outreach ee Rabshad Guriyeedka Magaalo-weynta) (Victoria)

Eastern Region: Taleefanka
(03) 9259 4200

Northern Region: Taleefanka
(03) 9450 4700

Southern Region: Taleefanka
(03) 9536 7777 ama
1800 627 727
(Khadka qalalaasaha guud ee saacadaha shaqada ka dib)

Mornington Peninsula: Taleefanka
(03) 5971 9454

Western Region: Taleefanka
(03) 9689 9588

WAYSS Frankston: Taleefanka
(03) 9781 4658

WAYSS Cranbourne: Taleefanka
(03) 5990 6789

WAYSS Rosebud: Taleefanka
(03) 5982 2863

WAYSS Dandenong: Taleefanka
(03) 9791 6111

WAYSS Narre Warren: Taleefanka
(03) 9703 0044

### Rural/Regional Domestic Violence Outreach Services (Victoria) Adeegyada Outreach Rabshadaha Guriyeed ee Miyiga/Gobolka (Victoria)

Geelong: Taleefanka
(03) 5346 8000

Warrnambool: Taleefanka
(03) 5561 1934

Shepparton: Taleefanka
(03) 5823 3200

Mildura: Taleefanka
(03) 5021 2130

Bendigo: Taleefanka
(03) 5443 4945

Swan Hill: Taleefanka
(03) 5033 1899

### Adeegga gudbinta Ragga

Adeega Gudbinta Ragga (Men's Referral Service) waa adeeg taleefan oo magaclaawe ah qarsoodina ah oo ay raggu siiyaan ragga. Waxay siisaa barta dhexe ee xiriirka ragga kuwaas oo raba inay joojiyaan dabeecadooda rabshada ama xadgudubka ah oo ay u gaystaan xubnaha qoyskooda.

Taleefanka 1300 766 491, Isniinta ilaa Jimcaha 8:00am ilaa 9:00pm; Weekend-yada 9:00am ilaa 5:00pm

# *Talooyinka sharciyeed*

## Federation of Community Legal Centres (Isutagga Xaruumaha Sharciyeed ee Bulshada)

Xarumahani waxay bixiyaan faahfaahin ku saabsan xarunta sharciyeed bulshada ee kuugu dhow iyo amarka faragelinta ee adeegyada taageerada maxkamadda.

Taleefanka (03) 9652 1500 ama ka eeg www.communitylaw.org.au

## Women's Legal Service Victoria (Adeegga Sharciyeed ee Haweenka Victoria)

Haweenka Victoria oo u baahan talo sharciyeed, macluumaadka ama gudbinta, iyadoon loo eegin dakhliga ama hantida.

Khadka Talo-bixinta Sharciga: Taleefan (03) 8622 0600 ama 1800 133 302 (taleefanka lacag la'aanta ee wacayaasha miyiga)

Saacadaha hawlgalka: Talaadada 5:30 pm illaa 8:00pm; Khamiista 5:30pm ilaa 8:00pm

## Victorian Legal Aid Telephone Information Service (Adeegga Macluumaadka Taleefanka ee Gargaarka Sharciyeed ee Victoria)

Waxay bixisaa adeegga macluumaadka sharciga ee lacag la'aanta ah. Haddii Ingiriisigu uusan ahayn luqadaada koowaad, waxaad wici kartaa oo aad weydiisan kartaa inaad la hadasho qof ku hadla luqaddaada.

Taleefan 1300 792 387, Isniinta ilaa Jimcaha 8:00am ilaa 6:00pm ama ka eeg www.legalaid.vic.gov.au

# *Sida loo soo sheego haddii aad ku jirto ama aad halis ugu jirto guurka khasabka ah*

Haddii aad ku jirto guur khasab ah ama aad ka walwalsan tahay in lagugu qasbo guur, fadlan ogow in caawimaad la heli karo oo aadan kali ku aheyn.

Waxaad samayn karto:

- Wac 000 haddii aad halis degdeg ah ugu jirto waxyeello
- Aad saldhigga booliiska
- Ka wac AFP taleefanka 131AFP (131 237)
- Helidda www.afp.gov.au

Haddii aad u baahato inaad la hadasho qof waxaad wici kartaa adeegyadan talabixinta qarsoodiga oo lacag la'aanta ah 24/7:

- 1800 RESPECT (1800 737 732) The National Sexual Assault, Domestic and Family Violence Counselling Service (Adeegga Talo-bixinta Rabshada Guriyeed iyo Qoyseed Xadgudubka Galmad Qaraneed)
- Lifeline 13 11 14 Crisis Support. Suicide Prevention (Taageerada Qalalaasaha: Ka-hortagga Isdadalaadda)
- Wixii talooyin dheeraad ah, ka wac the Australian Muslim Women's Centre for Human Rights (Xarunta Haweenka Muslimka ee Australia ee Xuquuqda Aadanaha) taleefanka (03)9481300 ama email nooga soo dir taleefanka reception@muslimwomenscentre.org.au
- Ka eeg www.mybluesky.org.au, wac (02) 9514 8115 ama textgaree 0481 070 844.

Islaamka iyo Muslimiintu way ka soo horjeedaan rabshadaha ka-dhanka ah Haweenka

The Australian Muslim Women's Centre for Human Rights

Islaamka iyo Muslimiintu way ka soo horjeedaan rabshadaha ka-dhanka ah Haweenka

The Australian Muslim Women's Centre for Human Rights

*Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee nazariis guud iyo mid gaaraba Naxariista*

*Ragga muslimiintaah iyo Haweenka Muslimaadka ah,*
*Ragga Mu'miniinta ahiyo Haweenka Mu'minaadkaah,*
*Ragga Eebe adeeca iyo Haweenka adeeca,*
*Ragga Runlowga ah  iyo Haweenka Runlowga ah,*
*Ragga Samra iyo Haweenka Samra,*
*Ragga u khushuuca Eebe  iyo Haweenka u khushuuca,*
*Ragga Sadaqaysta iyo Haweenka Sadaqqaysta,*
*Ragga Sooma iyo Haweenka Sooma,*

*Ragga isdhawra iyo Haweenka isdhawra,*
*iyo Ragga imbadan eebe xusa iyo Haweenka in badan xusa,*
*wuxuu Eebe u darbay Dambi dhaaf iyo ajir weyn.*

*Al-Ahzãb 33:35*

**The Australian Muslim Women's Centre for Human Rights**

Telefoonka: (03) 9481 3000

Fakiska: (03) 9481 3001

Email: reception@muslimwomenscentre.org.au

Web: www.ausmuslimwomenscentre.org.au

The Australian Muslim Women's Centre for Human Rights

*Equality without Exception*